# CIIDAANKA BOOLIISKA SOOMAALIYEED

Xiligan hadda la joogo Ciidanka Boliisku wuxuu ka kooban yahay 2 heer oo kala ah:-

- Boliiska Federaalka ah
- Boliiska Dowlad Goboleedyada oo hoos yimaada Dowlada Federaalka

Waxaana Boliiska Federaalka ah qaab dhismeedkiisu ka kooban yahay:-

1. Hoggaanka Howlaha
2. Hoggaanka Baarista Dambiyada
3. Hoggaanka Ciidanka
4. Hoggaanka Maaliyadda
5. Hoggaanka Saadka
6. Hoggaanka Caafimaadka
7. Hoggaanka Dhismaha
8. Hoggaanka Iskgaarsiinta
9. Hoggaanka Nabadgelyada Wadooyinka
10. Hoggaanka Ilaalinta Cashuuraha
11. Hoggaanka Interpol iyo Xiriirka Dibada
12. Hoggaanka Qorshaha iyo Tababarada
13. Hoggaanka Kormeerka
14. Hoggaanka Wacyigelinta Ciidanka
15. Hoggaanka Gaadiidka
16. Hoggaanka Booliseenta iyo Arimaha Bulshada
17. Hoggaanka Xiriirka Gobolada

Waxa kale oo Qaab Dhismeedka Ciidanka Boliiska Federaalka ah ku jira Fadhiyada soo socda:-

1. Fadhiyada Madaxa Banaan:-

I. Akademiyooyinka Boliiska (Kaahiye iyo Carmo)
II. Taliska Daraawiishta Boliiska
III. Birmadka Boliiska
IV. Ururka Taliska
V. Laanta Socotada Boliiska
VI. Kooxda Baando Muusiko

2. Fadhiyada Takhasuska Gaarka ah:-

I. RRT (Kooxda Falcelinta Degdega ah)
II. CTU (ka hortaga Argagixisada)
III. JIT (Baarista iyo Sheybaarada goobaha Dembiga)
IV. PBS ( kahortaga Miinooyinka iyo Walxaha Qarxa)
V. PIU ( Boliiska Xuuraanka Dambiyada )
VI. HT&ML ( Hijro Sharci daro ah & Dhaqidda Lacagta )
VII. JBV ( Dambiyada Galmada iyo Tacadiga Dumarka iyo Dhalaanka )
VIII. Anti Narcotic ( Ka hortaga Mukhaadaraadka )

# ***WAAJIBAADKA QAYBAHA BOLIISKA***

1. *Ilaalinta Amniga, Nabadgelyada & Xasilloonida Gobolka Soohdinta Qaybtu ku taal.*
2. *Maamulidda, Xiriirinta & Isuduwidda hawlaha Boliiska ee Gobolka.*
3. *Kormeeridda & ka warhaynta fadhiyada Boliiska Gobolka & hawlahooda*
4. *Isku xiridda & wada shaqaynta Boliiska Gobolka & Hay'adaha Dawladda*
5. *La dagaallanka Dembiyada Gobolka*
6. *Warbixinnada la xiriira arrimaha Gobolka ee ku saabsan Siyaasadda, Dhaqaalaha, Maciishadda, Hay'adaha/Shaqaalaha dawladda, Dareenka Bulshada, Waxbarashada, Garsoorka, Caafimaadka dadka iyo xoolaha, Dhaqdhaqaaqyada dawlad diidka ah & wixii la xiriira.*
7. *Warbixnnada la xiriira Boliiska Gobolka & hawlihiisa oo ay ku jiraan dembiyada & xaaladdaha la xiriira*
8. *Xannaanada, dhaqaalaha & ka warhaynta Gaadiidka, Raadiyeyaasha, Guryaha, Hubka & Aalaabta kale ee loogu talagalay fulinta hawlaha Boliiska Gobolka & daryeelidda Ciidanka.*
9. *Maamulidda, Tababrka, Hawlgelinta, Xannaanada & Wacyi gelinta Ciidanka Qaybta.*
10. *Fulinta amarrada ka soo baxa Taliska Boliiska*
11. *Xafidaadda & xannaanada Hantida Boliiska ee Ma guurtada ah.*

# ***WAAJIBAADKA SALDHIGYADA BOLIISKA***

1. *Ilaalinta Amniga,Nabadgelyada & Xasilloonida Degmada*
2. *Ka hortegidda & Baarista Dembiyada*
3. *Qabashada & Maxkamad geynta dembiilayaasha*
4. *Ururinta & Tebinta Tirada Dembiyada ee degmada*
5. *Daryeelidda hantida Boliiska ee saldhigga sida;- Baabuurta, Raadiyeyaasha, Hubka IWM.*
6. *Warbixinnada la xiriira arrimaha Degmada ee khuseeya Nabadgelyada, Siyaasadda, Dhaqaalaha, Maciishadda, Dareenka Bulshada, Waxbarashada, Hay'ada/Shaqaalaha Dawladda, Garsoorka, Caafimaadka xoolaha iyo dadka, & kuwa Boliiska hawlihiisa khuseeya.*
7. *Fulinta hawlaha Laamaha kale ee Boliiska ee aan Degamada joogin.*
8. *Warbixinnada la xiriira arrimaha Degmada eeku saabsan siyaasadda, dhaqaalaha, bulshada, tacliinta & wixii la mid ah.*
9. *Maamulidda, xannaanada, Wacyi gelinta& Tababarka Ciidanka Saldhigga.*
10. *Fulinta amarrada ka soo baxa Taliska Boliiska & Qaybta*
11. *Xafidaadda & Xannaanada hantida Boliiska*

## ***WAAJIBAADKA RUGTA BOLIISKA***

✓ *Rugta Boliisku waxay Saldhigga uga wakiil tahay fulinta hawlaha Boliiska ee laga qabanayo Tuulada ay ku taal & soohdinteeda.*

# ***HOGGAANKA BAARISTA DEMBIYADA***

1. *ka hortagga & baarista dembiyada waaweyn, Qabashada & Maxkamad geynta dembiilayaasha.*
2. *La talinta habka & farsamada bAarista Dembiyada*
3. *Bixinta shahaadooyinka Dembi la'aanta & warbixinnada ku saabsan shahaadooyinka aadaabta & Akhlaaqda.*
4. *Ka warhaynta & la socodka dhaqdhaqaaqa Dembiilayaasha & habka ay dembiyada u galaan.*
5. *Ururinta & isku dubbaridka tirada dembiyada dalka ka dhaca*
6. *Aqoonsiga & Baafinta Dembiilayaasha & Alaabta la aqoonsan karo oo la xado*
7. *Kaydinta faraha, Raadka, sawirrada & tilmaamaha Dembiilayaasha*
8. *Maxkamad ka doodista*
9. *Maamulidda, Daryeelka , Wacyi gelinta & Tababarka Ciidanka Hoggaanka.*

*Hoggaanka Baarista Dembiyadu waxuu ka midytahay fadhiyada madaxa bannaan oo taliska ku xiran, wuxuuna hoos yimaadaa Hoggaanka Hawlaha. Si loo kala caddeeyo hawlaha Hoggaanka Baarista Dembiyada & saldhigyada ee la xiriira xagga barista Dembiyada waxa hoos lagu muujinaya dembiyada waaweyn ee baaristooda gaar ahaan loogu xilsaaray Hoggaanka barista dembiyada*

- *Dilka*
- *Kufsashada*
- *Dhaca*
- *Booli Qaran wixii qiimahoodu ka badan yahay 5,000 Shilin*
- *Dembiyada la xiriira Maan dooriyeyaasha*
- *Dembiyada la xiriira samaynta, Beddelidda & ku isticmaalka lacagta beenta ah, shaabadaha & Boolooyinka Dawladda.*
- *Dembiyada la xiriira samaynta, ka baayacmushtarka & haysashada Hubka & Waxyaalaha Qarxa*
- *Sumaynta Ballaaran & sumaynta biyaha & Cuntada*
- *Dhicinta ula kac ah*
- *Halis gelinta, baabi'inta & Curyaaminta Beeraha, warshadaha & meelaha kale ee ah halbawlayaasha dhaqaalaha dalka*

- *tuugada wixii 10.000 Shilin qiimahoodu ka badan yahay ama inta ka yar laakiin siyaasad ku lug leh*
- *Samaynta waraaqaha beenta ah, beddelidda & baabi'inta kuwa rasmiga ah*
- *Dembiyada la xiriira barxidda & wax aanay ahayn u ekeysiinta*
- *waxyaalaha la quuto & daawooyinka been abuurka ah ama dhacsan ka baayac mushtarkooda*
- *Dembiyada ku lidka ah danjirayaasha shisheeye*
- *Dhammaan dembiyada ku lidka ah qarannimada soomaaliyeed Qod. 184-239 ee Xeerka Ciqaabaadka sida Basaashimada & Dembiyada kale qarannimada wax yeelaynaya.*
- *Dembiyada la xiriira afduubidda & qafaalashada dadaka.*
- *Meeshii H.B.DQayb, laan ama Kooxi u joogin, hawlaha la xiriira Baarista Dembiyada kor lagu soo sheegay waxaa qaban doona sasldhigyada kale ee Boliiska.*

*Haddii Saldhig uu qabto, la kulmo ama ka war helo dembi ka mid ah kuwa kor lagu soo sheegay, waa in uu ka qaado tallaabadii la habooneyd ee Boliisnimada ahayd dabadeedna u gudbiyo H.B.D si ay u dhammaystirto baaristiisa iyo maxkamad geynta.*

*Maamulka Hawlaha Boliisku waxuu awood u leeyahay in dembi kasta oo ka mid ah dembiyada kor lagu soo sheegay baaristiisa uu u daayo saldhiggii qabtay, la kulmay ama ugu horreeyntii ka war helay, haddii ay la noqoto in sidaa shaqadu ku fiicanaaneyso.*

*Haddii dembigu fudud yahay inkastoo uu ka mid yahay kuwa kor ku qoran oo loo xilsaaray H.B.D Saldhigguna uu ka qabtay wixii loo baahnaa, H.B.D waa ka codsan kartaa in Saldhiggu dhameystiro.*

*Wuxuu kaloo awood u leeyahay in uu dembi aan ku jirin kuwa kor lagu soo sheegay baaristiisa ku wareejiyo H.B.D haddii ay la habboonaato, Taliyaha Qaybtu marka laga reebo ka benaadir wuxuu awood u leeyahay in dembi kastoo ka mid ah dembiyada kor lagu soo sheegay ee ka dhaca soohdimaha qaybtiisa gudahooda uu baaristiisa u daayo sadhigga markaa gacanta ku haya, wuxuu kaloo awood u leeyahay in uu dembi aan ku jirin kuwa kor lagu soo sheegay baaristiisa ku wareejiyo Qaybta, Laanta ama Kooxda barista dembiyada ee Gobolka, haddii ay sidaasi la habboonaato.*

*H.B.D haddii ay ka warhesho ama ay qabato dembi aan ku jirin kuwa loo xilsaaray markay wixii ku habboonaa ka qabtaan, waxay u gudbin doonaan saldhigga ku shaqada leh si uu u dhammaaystiro maxkamaddana u geeyo.*

# Farsamada Baarista

1. Sida Sharcigu farayo baaristu waxay ka bilaabantaa qof dacwad qoraal ah keensaday ama warbixin la helay, sida ku cad Qod. 22ad ee XHCS ka dibna waxaa lagu qorayaa buuga dhacdooyinka ( Occurrence Book) OB.
2. Intaa kadib, Boliisku wuxuu bilaabayaa baarista dacwada ama warbixinta la helay sida ku cad qod. 24aad ee XHCS wuxuuna tagayaa goobta dambiga laga soo sheegay ama la kulmayaa qof kasta oo baarista dacwada muhiim u ah sida:- Eedaysanaha, Dhibbanaha, Markhaatiyada iyo wixii la xiriira Dambiga dhacay, isagoo wargelinaya Maxkamadda awooda u leh iyo Xeer Ilaalinta.
3. Sida uu farayo Qod 25aad ee XHCS waxaa la furayaa Tusaalaha Baarista oo lagu muujinayo dhamaan hawlaha baarista ee Ciidanka Boliiska ama shaqo kasta oo la qabtay oo ku saabsan Dacwadaas.
4. Sida ku cad qod. 26aad ee XHCS gabogabada Baarista wuxuu baaruhu maxkamada iyo Xeer ilaalinta u gudbinayaa Gungaarka dacwada.
5. Buuga Dhacdooyinka ee Bol.222 waxa ay walaalo yihiin diiwaanada Boliisku ku shaqeeyo ee kala ah:-


- Buuga Marag Muujinta,
- Buuga Hantida Maxaabiista
- Buuga Raashinka Maxaabiista
- Buuga wixii luma iyo wixii la helo iyo
- Diiwaanka Dambiyada

Taliyaha Saldhiga ama Taaliyaha Unuga Baarista Dambiyadu waxay dacwadaha Saldhiga soo gala ku kala qorayaan Baarayaasha Saldhiga, sidaa si la mid ah ayuu Taliyaha Hoggaanka baarista Dambiyada iyo fadhiyada hoos yimaada ay baarayaasha ugu kala qoraan dacwadaha soo gala hoggaanka Baarista Dambiyada, waxaana waajib ku ah madaxdaas iyo Taliyayaasha ka sareeyaaba in ay dacwadaha si wanaagsan u baaraan, haddii loo baahdana galdacwadeedka loo gudbiyo taliyayaasha qaybaha iyo Taliyaha Hoggaanka Baarista dambiyada si ay isugu dubaridaan baaarista ugana talo bixiyaan gungaarka dacwada loo gudbin doono Xeer Ilaalinta.

## Galka Baarista Dacwada iyo Xaashiyaha lagama maarmaanka u ah

Galka Baarista waxaa lagama maarmaan u ah inay la socdaan Xaashiyaha Boliisku ku shaqeeyo ee baaristu u baahan tahay sida:-

1. Tusaalaha Baarista
2. Dhaawac Muujinta
3. Astaamaha faraha
4. Cadeymaha Dhakhtarka ee kala duwan
5. Cadaynta Dhimashada
6. Sawirka qofka dhintay
   Xukunka kaddib, sawirka eedaysanaha oo 3 jeer sawiran lambarkiisuna uu shafka ugu qoran yahay, xukunka ku dhacvay oo la keeno Xafiiska keedinta Dambiyada (Criminal Record Office) isagoo waafaqsan crime register-ka.


GALKA DACWADDA
1. B.D.
1.
2.
2. HORDHAC
1
2
3. CADDAYMAHA
EEDEYSANE
DHIBBANE
MARKHAATI
4. TUSMADA BAARISTA
5. DHAAWAC MUUJIN
6. HORGEYN
7. XALAALEYN
8. MUDDO KORDHIN
9. ASTAAMAHA FARAHA
10. SAWIR
11.CODSIGA CADDAYNTA DEMBIGA
BOLIISKA
12. JAWAABTA CADDAYNTA DEMBIGA
DHAKHTARKA
13. COSDIGA SABABTA DHIMASHADA
BOLIISKA
14. JAWAABTA SABABTA DHIMASHADA
DHAKHTARKA
15. CODSIGA AASIDDA MEYDKA
BOLIISKA
16. OGOLAANSHAHA X/ILAAL AASIDDA MEYDKA
X/ILAAL
17. CODSIGA FAOISTA MEYDKA
BOLIISKA
18. OGOLAANSHAHA X/ILAALFAQISTA MEYDKA
X/ILAAL
19. GUNGAAR
NOOCA DEMBIGA
TAARIIKHDA DEMBIGA
GOOBTA DEMBIGA
MAGACA EERSADAHA
MAGACA EEDEYSANAHA
MAGACA DHIBBANAHA
OODOB IYO XEER
MAXKAMADDA AWOODDA U LEH
CODSIGA GUDBINTA XABSIGA
OGGOL.GUDBINTA XABSIGA EE MAXK
MUDDEYNTA DHEGEYSIGA DACWADDA MAXKAMADDA
U GUDBINTA X/ILAAL. M/MUUJINTA BOLIISKA
KEENISTA MARKHAATIYADA BOLIISKA
XABSIKA SOO SAARISTA EEDEYSANAHA BOLIISKA
KU CELINTA XABSIGA HADDII XUKUN DHACO BOLIISKA
DIB U XIRIS & RACFAAN QAADASHO BOL/XILAAL